Digniin Sharciyeed (CART Disclaimer)

Qoraalkan oo ah mid qabyo ah, oo laga yaabo inuu ka maqan yahay erayo, uu leeyahay qaladaad higgaad ah ama ereyo si guud loo tarjumay, waxaa degdeg loogu soo in la akhriyo, mana aha qoraal rasmi oo eray-eray u dhigma. Loomana adeegsan karo tixraac rasmi ah.

ASLIS - Munaasabadda Dabbaaldega 50-aad ee Barnaamijka Waxbarashada Qoyska Carruurnimada Hore.

05/07/2025

>>MI YANG: Waa hagaag, subax wanaagsan dhamaantiin! Ku soo dhowaada dabaaldegga 50-aad ee Barnaamijka Waxbarashada Qoyska Carruurnimada Hore, ECFE. Aad iyo aad baad ugu mahadsan tihiin kooxda teddy bear band oo qaaday heesta “ECFE, waan ku jecelnahay.” Munaasabaddan waxaa martigelinaya Waaxda Carruurta iyo Qoyska ee ECFE. Aad baan ugu faraxsanahay inaan idinla joogo maanta anagoo uwada dabaaldegayna guushan weyn. ECFE oo 50 sanno laga hirgeliyay Minnesota. Ma aha Maanta oo kaliya in aan dib u milicsanno waxyaabihii aan gaarnay, ee waa in aan sharafno qoysaska, macallimiinta, iyo bulshooyinka dhisay dhaxal rajadeed, barasho iyo xiriir. Ka hor inta aynaan bilaabin, halkan waxaa kugu sheegeynaa waxyaabo muhiim ah oo aad u baahan tahay inaad ogaato. Munaasabadda waxay soconaysaa 9:30 – 10:30. Si toos ah boo duubayaa. Kaliya wejiyada iyo codadka dadka hadlaya ayaa la maqli doonaa ama la arki doonaa. Makarafoonka iyo qaybta sheekaysiga (chat) waxay shaqaynayaan oo keliya dadka hadlaya. Qoraallada hoosta ka muuqda (captions) waa la heli karaa — waxaad dhaqaajin kartaa astaanta qoraallada. Turjumaadda luqadda Calaamadaha Ameerikaanka (ASL) sidoo kale waa laga heli karaa shaashaddaada.Anigu waxaan ahay Mi Yang, aad ayaan ugu faraxsanahay inaan noqdo qofka hagaya munaasabadda maanta. Halkan hoose waxaa ah waxyaabaha aan fileyno in ay dhacaan: iimeyl soo dhoweyn ah oo ka imanaya Ku-xigeenka Komishanka Diane, milicsi taariikheed oo ku saabsan ECFE oo uu la wadaagayo Mike Brown, sheekooyin awood badan oo ka imanaya qoysaska ECFE, wada sheekeysi qoto dheer oo lala yeelanayo la-hawlgalayaasha oo uu hogaaminayo Darcy Rodriguez, “Cunto la ECFE” oo lala qaadanayo Kelly, iyo inaad wax badan ka ogaato barnaamijka *Help Me Connect* iyadoo lagu soo gabagabeynayo codbixin kooban.Aan bilowno. Anagoo u dabbaaldegayna guushan gaarka ah, waxaa sharaf noo ah inaan soo dhaweyno hoggaamiye saameyn ku leh mustaqbalka waxbarashada carruurnimada hore ee Minnesota. Diane waa Ku-xigeenka Komishanka ee Waxbarashada Carruurnimada Hore ee Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska. Waxay hogaamisaa maamulka waxbarashada hore, iyadoo mideyneysa adeegyada xannaanada carruurta. Waxaan nasiib u leenahay in aan haysanno aragtideeda, qalbigeeda, iyo khibraddeeda hoggaamineed ee ku aaddan horumarinta waxbarashada carruurta ee Minnesota.Ku soo dhawoow Ku-xigeenka Komishanka.

>>DIANNE HAULCY: Waad ku mahadsan tahay Mi Yang. Waxaan rabaa inaan ku bilaabo inaan iraahdo sharaf weyn ayay ii tahay inaan halkan joogo maanta. Runtii aad ayaan ugu faraxsanahay, waxaana dareemayaa nasiib

wanaag in la i weydiiyay inaan ka mid noqdo munaasabaddan oo aan idinla joogo maanta. Si aan ugu dabaaldegno 50 sano jirka ee ECFE. Xilligan wuxuu matalayaa wax ka badan shan tobnadood oo sano oo barnaamijyo ah. Waa xusuusin xooggan oo muujinaysa waxa dhaca marka aan maalgelinno barayaasheena—caruurta iyo qoysaskooda. Sidaas darteed, maanta waxaan u dabaaldegaynaa saamaynta waarta ee ECFE. Waxaan dib u milicsanaynaa safarkii noo keenay halkan. Waxaan sidoo kale eegaynaa 50-ka sano ee soo socda, anagoo taageeraya carruurta ku nool guud ahaan gobolka Minnesota.ECFE waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu gaar ah uguna qiimaha badan ee Minnesota ay leedahay. Waxaa laga bixiyaa 323 ka mid ah 327 degmo dugsiyeed. Waxa uu noqday tiir-dhexaad muhiim u ah qoysaska laga soo bilaabo ilmaha dhashay ilaa marka ay carruurtu dugsiga ku biirayaan. Maxaa ka dhigaya ECFE mid gaar ah? Waa qalbigeeda. Waa meel ay waalidiinta iyo daryeelayaashu ku bartaan, ku koraan, kuna xiriiraan. Waa meel waalidnimada lagu taageero laguna xoojiyo iyada oo loo marayo wada sheekeysi daacad ah, agab waxtar leh, iyo taageero bulsho. Carruurtu waxay kobcaan iyaga oo la ciyaaraya si macno leh, lana falgalaya si ay u yeeshaan barasho iyo guul nololeed oo waarta. Waa sidoo kale meel 30 sano kahor aan anigu la fadhiyay curadkaygii, aniga iyo waalidiin kale oo caruurtooda wata, waxaanan abuurnay meel ammaan ah oo su’aalo lagu weydiiyo laguna barto farsamooyin waalidnimo oo qiimo leh. ECFE waxa uu ku kobcaa iskaashi. Qoysaska iyo xirfadlayaashu waxay si wadajir ah u shaqeeyaan—waxa jira iskaashi heer deegaan ah oo lala leeyahay xarumaha caafimaadka, barnaamijyo, kaniisado, fanaaniin dhaqameed—dhammaantood waxay abuuraan shabakad qani ah oo taageero ah. Barayaal waalidnimo oo ruqsadaysan iyo macallimiin carruurnimo hore ayaa keena khibrad qoto dheer si ay u hubiyaan in qoysasku helaan hagitaan tayo sare leh. Natiijadu waa maxay? Qoysas xooggan. Bulshooyin si wanaagsan isugu xiran. Carruur diyaar u ah in ay guul gaaraan. Sidaas darteed, marka aan dib u milicsano 50-kii sano ee la soo dhaafay, waxaan rabnaa inaan aqoonsanno in ECFE ay nolosha taabatay kumannaan qoys oo ku nool Minnesota—anigeygana waa ka mid. Xidhiidhada halkan lagu dhisay waxay aad uga dheereeyaan fasalka—waxa ay abuuraan xidhiidho waqti dheer ah iyo nidaamyo taageero.Maanta, waxaan maqli doonaa sheekooyin xooggan oo ka imanaya qoysaska ECFE—sheekooyin muujinaya saameynta dhabta ah ee bani’aadannimo ee barnaamijkan. Codadkani waa wax ka badan milicsi. Waa baaq ficil. Waxay inoo xasuusinayaan sababta ECFE ay muhiim u tahay iyo sababta aynu u sii wadi karno u doodista mustaqbalkeeda. Marka aan eegno mustaqbalka, waa inaan sii wadnaa kor u qaadista sheekooyinkan. Waa inaan hubinno in go’aan-qaadeyaashu maqlaan, maxaa yeelay codadka bulshada waa inay qaabeeyaan mustaqbalka waxbarashada hore ee Minnesota.Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska gudaheeda, waxaan aragnaa gobol ay qoysas,

bulshooyin, dugsiyo, iyo nidaamyo wadajir u shaqeeyaan si ay u siiyaan fursado waxbarasho oo caddaalad ah. Gudaha maamulka waxbarashada hore, waxaan hormuud uga nahay sinnaanta—maxaa yeelay waan ogahay in dhammaan carruurta aysan ka bilaabin meel isku mid ah. Waxaan u heellan nahay inaan ka qaadno caqabadaha si dhammaan carruurta, iyadoon loo eegin jinsiyad, dhaqaale, qowmiyad, ama karti, ay u helaan wixii ay u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan. Barnaamijyada sida ECFE waa furaha aragtidan. Waxay qoysaska ku xiraan kheyraad muhiim ah, waxay taageeraan daryeelayaal, waxayna dhisaan saldhig barasho waarta. Markaa maanta aan u dabaaldegno 50 sano ee saamaynta ECFE. Aan sharaf siino macallimiinta, daryeelayaasha, iyo la-hawlgalayaasha bulshada ee ka dhigay barnaamijkan mid guuleysta. Hadda, dhammaantiin waxaan idin leeyahay mahadsanidiin. Marka aan dib u ballanqaadeyno taageerada ECFE, waxaan ognahay in aan dhisayno mustaqbal ka sii xoog badan oo loogu talagalay carruurta iyo qoysaska Minnesota. Mahadsanid inaad halkan joogto. Mahadsanid dareenkaaga, iskaashigaaga, iyo rumaysadkaaga ku aaddan waxbarashada hore. Waa ku mahadsan tihiin—halkan ayaan ku leenahay 50ka sano ee soo socda.
Mahadsanid.

>> Aad baad ugu mahadsan tahay Ku-xigeenka Komishanka, Iyo wadaagidda aragtidaada ku aaddan carruurnimada hore ee Minnesota. Hoggaamintaada iyo go’aankaaga aad ku taageerayso qoysaska iyo carruurta runtii waxay keentay isbeddel muuqda. Mahadsanid. Hadda, anagoo milicsanayna mustaqbalka xiisaha leh ee ina sugaya, aan sidoo kale waqti u helno in aan dib u eegno meesha ay wax walba ka bilaabmeen. ECFE waxay leedahay taariikh qani ah oo door muhiim ah ka ciyaartay qaabeynta taageerada aan maanta siino qoysaska. Waxaan ku faraxsanahay inaan soo bandhigo Mike Brown, khabiir ku takhasusay maamulka barnaamijyada ee Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska (DCYF), oo hagi doona aragtida mustaqbalka ee ECFE iyo sida uu isbeddel ugu soo maray 50-kii sano ee la soo dhaafay. Ku soo dhawoow Mike Brown.

>>MIKE BROWN: Mahadsanid. Subax wanaagsan dhammaan, mahadsanid Mi Yang. ECFE waxay leedahay taariikh dhiirrigelin leh. Sharaf weyn bay ii tahay inaan la wadaago. Waxaa xitaa ka sii weyn farxaddaydu in aan ka mid ahaa taariikhdaas, anigoo doorar kala duwan kasoo qabtay. Waqtigeyga maanta, waxaan jeclaan lahaa inaan iftiimiyo dhowr waqti muhiim ah oo ka mid ah taariikhda ECFE oo aan u arko inay si gaar ah muhiim u yihiin, gaar ahaan marka aan dib u milicsano in ka badan 50 sano—ilaa 1960-meeyadii.Xilligaas wuxuu ahaa waqti aad muhiim u ah oo lagu samaynayay cilmi-baaris ku saabsan horumarka ilmaha. Waxaan aragnay barnaamijyo iyo daraasado weli maanta muhiim ah, sida Head Start iyo mashruuca Perry Preschool, oo

labadaba waalidku door dhexdhexaad ah ka ciyaarayay. Haddaan si kooban u xuso Head Start, iyaguna hadda waxay u dabaaldegayaan sannadguuradooda 60-aad.Waa intii lagu jiray waqtigaas oo Senator Jerry Hughes uu bartay muhiimada horumarka carruurnimada hore, taasoo saameyn ku yeelatay abuuridda fikir cusub oo ahaa barnaamij qoys oo laga hirgeliyo dugsiyada.Inkastoo hindisihii ugu horreeyay ee sharciga Minnesota la horgeeyay sanadkii 1973 uusan meel marin, kii labaad ayaa la ansixiyay sanadkii 1974 iyadoo la bilaabay lix goobood oo tijaabo ah (pilot sites). Iyadoo lagu saleynayo goobihii tijaabada ahaa ee hore, barnaamijku si degdeg ah ayuu u ballaadhay. Waxaa la gaaray 12 goobood sannadkii 1975, 22 sannadkii 1977, iyo 36 sannadkii 1979. Markii la gaaray 1989, ECFE wuxuu gaadhay ku dhawaad dhammaan degmooyinka dugsiyada ee Minnesota. Laakiin aan dib ugu noqdo warbixintii sharci-dejinta ee 1981, taasoo ah waqti kale oo aan doonayo inaan iftiimiyo. Waa warbixinahan sharci-dejinta ee aan runtii ka arki karno qiyamka iyo mudnaanta lagu dhisay aasaaska ECFE—abuuritaanka barnaamij horay uga sii hormaray wakhtigiisa. Warbixintaas waxay ka koobnayd sagaal talo-bixinood oo dareen ahaan u muuqda kuwo hadda la qoray afar sano kahor halkii ay ka ahaan lahaayeen 44 sano kahor. Waxay noqdeen qayb ka mid ah saldhigga adag ee ECFE.Mid, ECFE waa in loo arkaa qayb muhiim ah oo ka tirsan nidaamka waxbarashada ee sii socda ee Minnesota. Waxa lagu saleynayaa xog aruurinno ay ku jiraan fikrado la xiriira faa'iidada laga helo maalgelinta, natiijooyin wax ku ool ah, hoos u dhigidda kharashyada, iyo kobcinta ka qaybgalka qoysaska—arrimo aan weli maanta ka doodayno.Warbixintu sidoo kale waxay adkaynaysaa muhiimadda ay leedahay in ECFE si dhow loola midoobo waxbarashada dugsiga hoose. Maanta, ECFE wuxuu gaari karaa ilaa fasalka saddexaad. Talo-bixintii saddexaad waxay ahayd in ECFE uu ufurnaado dhammaan qoysaska Minnesota. Ka qaybgalka waa inuu matalaa noocyada kala duwan ee qoysaska ay u adeegayaan iyadoo la ixtiraamayo arrimo la xiriira waxbarasho, dakhliga, iyo sifooyinka qowmiyadeed. ECFE waxaa laga yaabaa inuu u baahdo wacyigelin iyo dadaallo xooggan si loo helo shaqaale kala duwan. Xubinimada golaha talo-bixinta sidoo kale waa arrin muhiim ah. Kuwani waa arrimo aan weli maanta ka wada hadalno. Waxaad goor danbe maqli doontaan wax intaas sii dheer. Qodobka afraad, waxay soo jeediyeen in maamulka iyo shaqaaluhu loo habeeyo si gaar ah—tani waa astaamo kale oo muhiim u ah ECFE. ECFE waa barnaamij guud ah, laakiin sidoo kale waa barnaamij si gaar ah loo habeeyay. Waxaan taas ku aragnay qaybaha sida waxbarashada waalidka, barnaamijyada loogu talagalay waalidiinta xiran (born incarcerated), adeegyada aabbayaasha iyo wacyigelinta loogu tago bixiyeyaasha deriska ah.Golayaasha talo-bixinta ee waalidiinta ee barnaamijyada ECFE waa inay sidoo kale matalaan bulshooyinkooda, kana qayb qaataan horumarinta, isku dubbaridka, kormeerka, iyo dib u eegista barnaamijyada iyo adeegyada ECFE.

Qodobka lixaad waa mid kale oo muhiim ah oo warbixintu muujisay: tayada shaqaalaha barnaamijyada ECFE waa mid muhiim ah si guul looga gaaro hirgelintooda. Tani waa sababta ECFE looga baahan yahay ruqsad macallinimo si loogu shaqeeyo carruurta da'da hore, iyo ruqsad kale si loogu shaqeeyo dadka waaweyn. Marka loo eego maanta iyo sannadka 2028, 47 sano kadib warbixintan, waxaa jiri doona shuruud cusub oo dhahaysa dhammaan barayaasha waxbarashada carruurnimada ee ka shaqeeya dugsiyada guud waa in ay haystaan ruqsad macallinimo. Qodobka toddobaad wuxuu tilmaamayaa in maalgelinta kaabayaasha iyo xarumaha ay aad muhiim u yihiin, maadaama uu ahaa barnaamij cusub. Qodobka siddeedaad wuxuu sheegay in fikradda ECFE si xoog leh diiradda u saartay xaafadaha iyo barnaamijyada bulshada. Sanadihii la soo dhaafay, waxaan aragnay in barnaamij kasta oo ECFE uu yahay mid gaar ah, sababtoo ah ujeedadu waxay ahayd in barnaamijyadu loo qaabeeyo si ay uga jawaabaan baahiyaha qoysaska iyo bulshooyinkooda.Qodobka sagaalaad wuxuu tilmaamayaa in la ururiyo xog waqti dheer ah oo gaar u ah barnaamijyada Minnesota si ay u noqoto saldhig lagu taageero mustaqbalka ECFE.Qof kasta wuu arki karaa saameynta talooyinkan. Halkan waxaa ah dhowr waxyaalood oo la hirgeliyay kadib warbixintii 1981:

Sanadkii 1983, sharci cusub ayaa wareejiyay maalgelinta iyo masuuliyadda barnaamijyada ECFE oo loo wareejiyay waxbarashada bulshada (community education), halkaas oo ay weli ka tirsan tahay maanta. Maalgelinta waxaa laga beddelay deeqo una beddelmay taageero per capita ah. Sanadkii 1986, waxaan aragnay sanadkii ugu horreeyay ee hirgelinta barnaamijka iyadoo la adeegsanayo maalgelin heer gobol ah. Waxaa sannadkaas ka qayb galay 253 degmo dugsiyeed. Maalgelintu waxay ahayd $79 cunagiiba marka la eego carruurta da'doodu u dhaxeyso dhalasho ilaa afar sano jir. Laakiin waxa ugu muhiimsan ee muddada 50 sano ah ah, waa mawduuca si joogto ah u soo noqnoqda ee aad maanta maqli doontaan: dadka ECFE – shaqaalaha, u doodayayaasha, iyo ka qaybgalayaasha.Haddii aad fiiriso taariikhda ECFE ee shaashada ku qoran, waxaad arki doontaa sanadihii ugu sarreeyay ee ka qaybgalka ECFE. Muddo 50 sano ah, qiyaastii 4.5 milyan oo carruur ah iyo 4.7 milyan oo dad waaweyn ah ayaa ka qayb qaatay fasallada iyo dhacdooyinka ECFE. Sanad walba, barnaamijyadu waxaa looga baahan yahay inay fuliyaan qiimayn baahida bulshada (community needs assessment), waxaana mar walba farxad noo ah inaan akhrinno natiijooyinka. Mid ka mid ah waxyaabaha aan weydiino barnaamijyada marka ay gudbinayaan baahidooda waa inay la wadaagaan hal muuqaal iftiiminaya shaqadooda. Waxa ugu badan ee la iftiimiyo mar walba waa xiriirkooda qoysaska.Waxaan leenahay waalidiinta ugu wanaagsan. Qoysasku waa cajiib. Aad baan ugu faraxsanahay inaan la shaqeeyo oo aan daawado iyaga oo wada shaqeynaya, ciyaaraya. Anigu waxaan noqday waalid aad uga wanaagsan sidii hore, sababtoo ah

waxbarashada waalidka ee ECFE. Saaxiibadayda hooyooyinka ah ee cajiibka ah waxay si fiican ugu habboon yihiin nolosheyda, sidoo kale gabadhaydu aad bay u kalsooni badan tahay marka ay la ciyaarayso carruurta kale sababtoo ah ECFE.Tani waxay ka timid waalid—waana tusaalooyin muujinaya halka xiriirada lagu dhiso ee ECFE. Waxaan aragnay tusaalooyinkan oo kale dhammaan taariikhda 50 sano ee ECFE uu jiray. Wax kale oo muhiim ah waa shaqaalaha sameeya barnaamijyadan. Barnaamijyada ECFE aad bay ugu faanaan shaqaalahooda. Waxaan taas si qoto dheer u aragnay xilligii cudurka safmarka COVID-19, markaas oo shaqaale badan oo ECFE ah ay si gaar ah ugu dedaaleen inay sii siiyaan qoysaska iyo bulshooyinka taageero, adeegyo, iyo kheyraad. Ugu dambeyn, waxaan rabaa inaan xuso hoggaamiyeyaasha iyo u doodayayaasha. Waa mid ku habboon in aan ku soo gabagabeeyo meesha aan ka bilaabay. ECFE ma joogto kaliya sababo la xiriira hoggaaminta aan kala go’a lahayn ee Senator Hughes, balse sidoo kale hoggaaminta dad badan. Hoggaamiye aynu dhammaanteen wax ka baranay—si toos ah ama si dadban. Hoggaamiyaasha aqoonsaday muhiimada barashada joogtada ah ee maamulka carruurnimada hore. Sanadkii 1986, waxaan qabannay shirkii ugu horreeyay ee Isku-duwayaasha ECFE. Shiro gobol ahaaneed ayaa la qabtay muddo tobanaan sano ah. ECFE waxay ku saabsan tahay taageero iyo awood-siinta. Waxaan taasi ka aragnaa guud ahaan gobolka. Laga bilaabo hoggaamiyaasha heer dowlad-goboleed sida Betty Cook iyo Lois, ilaa hoggaamiyeyaasha cusub ee hadda tababaranaya sida Darcy iyo [magac]. Jaamacadaha sare, waxaan wax ka barannay barayaal sida Glenn Palma ee St. Cloud State iyo Marty Rossman ee Jaamacadda Minnesota. Laga soo bilaabo kooxaha xiriirka goboleed, ilaa hoggaamiyeyaasha barnaamijyada iyo degmooyinka ee hadda jira—dhamaanteen waxaan leenahay qof nagu dhiirrigeliyay inaan si ka wanaagsan ugu shaqeyno carruurta, qoysaska, iyo bulshooyinkeenna. Senator Hughes wuxuu beeray abuurka. Hadda annaga ayaa hubinayna in ay kobcaan oo midho dhalaan. Mahadsanid.

>>MI YANG: Waad ku mahadsan tahay Mike, milicsigaas qotada dheer ee ku saabsan taariikhda ECFE iyo taariikhda fog ee aan soo marnay. Aad bay u dhiirrigelinaysaa in la arko sida barnaamijkan uu u kobcay una yeeshay saameyn waarta oo ku baahday qoysaska Minnesota. Hadda, aan u gudubno codadka ugu muhiimsan—qoysaskeena ECFE. Aan dhegeysanno [Magaca] oo ka socda White Bear iyo Melissa oo ka socota St. Cloud. Waayo-aragnimadooda shakhsiga ah waxay inna xasuusinayaan saamaynta nolosha beddesha ee ECFE ay weli leedahay—taas oo ah asaaska jiritaankeena: in aan awood siino, isku xirno, kor u qaadno qoysaska guud ahaan Minnesota.Aan dhegeysano sheekooyinkooda.

[Muuqaal]

>> Fasalkaan waxaan ku dareemnaa sida gurigeenna oo kale. Marka aad gudaha u soo gasho fasalka, waxaad dareemaysaa sida qoys, adigoo og inaad waalidiinta kale la wadaagi karto wax kasta oo qoyskaaga ku saabsan, isla markaana og inaad leedahay macallin diyaar kuu ah oo ku garab taagan. Mar walba waxay naga siisaa xog ku saabsan wixii aan ka walaacsanahay. Waxay noo ahayd taageero aad u weyn. Waxaad dareemaysaa inaadan kaligaa ahayn. Waxaad la wadaagi kartaa wax kasta fasalkaan. Waxaad dareemaysaa ammaan. Sidaan horey u iri, waxaad dareemaysaa inaad gurigaaga joogto. Taasi waa wax aan si weyn u qadariyo—waayo sida aad u dareemayso ayey muhiim u tahay. Barnaamijkani wuxuu i caawiyay, wuxuu iga caawiyay inaan yeesho xiriir wanaagsan oo aan la yeesho carruurteyda iyo qoyskeyga oo dhan. Kahor intaanan iman fasalkan, ma aqoon meel aan caruurteyda la tago. Waxaan barnaamijkan ka bartay wax badan oo ku saabsan horumarka ilmaha iyo dhammaan dhinacyada horumarka.Ma hayo erayo aan ku cabbiro sida aan u qadariyo, iyo sida aan ugu faraxsanahay in aan ka mid noqdo barnaamijkan. Waxaan nahay qoys halkan. Barnaamijkan gudaahiisa, gabadheydu mar walba way ku faraxsan tahay inay timaado. Xitaa maalinta Jimcaha, waxay rabtaa inay timaado. Waxay tiraahdaa, “Macallimiinta ayaa i sugaya.” Taasi waxay iga dhigtay qof aad u mahadnaqaya. Waan ogahay in macallimiintu ay caruurta jecel yihiin. Mar walba waxay rabaan waxa ugu wanaagsan carruurteena. Waxa aad ka arki kartaa jacaylka ay macallimiintu u qabaan ardayda. Waxaad ka arki kartaa sida ay ugu dadaalaan carruurteena. Mahadsanid macallimiinta, iyo Michelle, iyo dhammaan dadka ku lugta leh. Mahadsanid fursadda aan u helay inaan halkan joogo. Ma jiro eray si buuxda u cabbiri kara qadarinteenna barnaamijkan.

>> Aniga sababta aan u jecelahay ECFE ee Tamarack waa in markaan dhashay ilmihii iigu weynaa ay ahayd intii lagu jiray COVID-19. Aad bay u adkayd in la helo waqti lagula xiriiri karo waalidiin kale ama lagu arki karo waalidiin kale. Waxaa jiray kalinimo. Inaan halkaan imaado oo aan la sameyso xiriir kooxeed ee hooyooyin ayaa cajiib ah—waan ku faraxsanaa. Ma heli karin dad ka wanaagsan oo aan wax ka barto ama aan la xiriiro. Tani aad bay iigu ahayd muhiim. Waa sababta aan si aan leexleexad lahayn ugu jeclahay ECFE. Waxaa iga horeeyay laba sano oo dareen go’doon ah. Markaan ECFE imaaday, waxay ahayd wax gaar ah. Ilaa iyo hadda waxaan xiriir la leenahay dadkii aan la bilownay barnaamijka ECFE. Waxaan noqonnay saaxiibo aad isugu dhow. Carruurtayaduna sidoo kale way is yaqaanaan.Xiriirrada waalidiinta ee halkaas ka abuurmay waa kuwo aan u arko meel aad ku tagto marka aad dareemayso kalinimo. Ka mid ahaanshaha la-hawlgalka Tamarack waxay

ahayd waayo-aragnimo aad u gaar ah. Maadaama aad tahay waalid, mararka qaar way cabsi gelin kartaa in aad carruurta maalin walba bannaanka u keento oo aad wax walba isku daydo inaad sameyso.Laakin marka aan u baxno ciyaar bannaanka ah, uma baahnin sharci gaar ah ama hawlo qorshaysan oo fara badan. Kaliya in aan bannaanka joogno, soconno—waxay carruurta aad ugu faa'iido badan tahay.Maanta waxaan rabaa inaan si gaar ah ugu mahadceliyo macallin cajiib ah. Anigu malaha ma noqon lahaa waalidka aan maanta ahay haddii aysan iyadu jirin. Waxay mar walba maskaxdayda ka dhex jirtaa. Mararka qaar waxaan ku fikiraa: "Maxay macallintu oran lahayd?" Waxaan ka heley talooyin badan, waxaan dhegeystay sheekooyinka dadka kale si aan wax uga barto, una caawiyo kuwa kale.Waxaa la yiraahdaa "waxaa loo baahan yahay tuulo si loo koriyaa ilmo." Barnaamijkan waa tuuladaydii. Rajadaydu waa inaan arko iskaashi badan oo sidan oo kale ah. Waxay bixiyaan fursado gaar ah—oo aan ahayn fasal kaliya. Dad badan ma heli lahaayeen fursado sidan oo kale ah haddii aanu iskaashigan jirin.Weli waxaan la kulannaa carruurta waaweyn ee aan barnaamijka ku billownay. Waxaan leenahay saaxiibtinimo aad u wanaagsan, taas oo ah wax xiiso leh in la daawado. Weli waxaan fiirinnaa sawirradii carruurta waaweyn. Waxaan is weydiinnaa: "Ma aaminsan tahay in halkan aan ku kulannay?" Barnaamijkan runtii waa mid aad u gaar ah.

>> Waxbarashada qoyska waxay si weyn u saameysay qoyskeyga—barnaamijyada hal-abuurka leh ee fasallada qoyska iyo wakhtiyada wadajirka ah waxay dhiseen aasaas adag oo ubadkeyga ah, taasna aad ayaan ugu mahadnaqay. Runtii waxay si togan u saameysay horumarka carruurta, waxaana rajeynayaa in 50-ka sano ee soo socda ay sii wadi doonto inay carruur badan u noqoto fursad horumarineed. Waxaan rajeynayaa in waxbarashada qoyska ay gaarsiiso dhallinyarada si ay ugu dhiiradaan waxyaabaha cajiibka ah ee ay ka qabtaan guud ahaan gobolka. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in lagu daro waxyaabo dhaqan ahaan la jaanqaadaya bulshooyinkeenna kala duwan oo baahi u qaba taageero gaar ah. Rajadayda ugu weyn waa in waxbarashada qoyska ay gaarto ilmo kasta oo ku nool gobolka Minnesota. Si ay uga faa'iidaystaan kheyraadka ay bixiso waxbarashada qoyska—waayo waxaa la yiraahdaa "tuulo ayaa loo baahan yahay si ilmo loo koriyo."Qeyb ka mid ah qoyskeyga waxbarashada qoyska waxay ka beddeshay wax badan nolosha carruurnimada. Gabadhaydu waxay u qalantay in ay dhigato dugsiga xannaanada. Hadda waxaan hayaa gabar 5 jir ah oo diyaar u ah in ay dhigato kindergarten, iyo ilmo 2 jir ah oo guriga loogu yimaado (home visits), sidoo kale waxaan aadnaa fasallada qoyska si aan u wada qaadanno waqti, wax u baranno, oo aan u korno. Runtii ma garanayo waxa aan ahaan lahaa aniga oo ah hooyo haddii aanan haysan barnaamijkan. Qoys ahaan, lama haysan lahayn fursadahan iyo kheyraadkan haddii aanan

helin barnaamijkan. Rajadaydu waa inaan gaarno qoysas badan, gaar ahaan qoysaska kala duwan si ay u helaan fursadaha jira. Waxaa loo baahan yahay tuulo si ilmo loo koriyo, waana muhiim inaan dhisno tuulo u gaar ah carruurteena si ay mustaqbal guul leh u yeeshaan. Aad baan ugu faraxsanahay fursaddan ay qoyskeygu helay. Waxaan sii wadi doonaa u doodista, la wadaagidda kheyraadka iyo wixii aan ogahay anigoo ah hooyo iyo hoggaamiye bulsho.Qoysas iyo bulshooyin badan ayaa helay fursad ay ugu biiraan waxbarashada qoyska, waana mid aan si weyn u qadarinayo.

>>MI YANG: Haye, markaa, waad ku mahadsan tihiin inaad waqti u heshay inaad dhegeysataan sheekooyinka xooggan ee muujinaya sida ECFE ay u saameysay afartan qoys. Sheekooyinkani waxay ina xasuusinayaan isbeddelka qoto dheer ee aan sameyn karno marka aan si wadajir ah u taageerno qoysaska iyo bulshada oo dhan.Haddaba, waxaan idiinku baaqeynaa inaad la wadaagtaan sheekadiinna ururinta sheekooyinka ee Minnesota Story Collective. Sheeko kasta waa muhiim. Hoggaamiyeyaasha heer gobol iyo heer maxalli ee Minnesota waxay ka shaqeynayaan horumarinta adeegyada qoysaska iyo carruurta. Meesha ugu fiican ee laga barto waa waayo-aragnimada nolosha dadka.La wadaagidda sheekadaada waxay ka dhigan tahay in fikradahaaga iyo waayo-aragnimadaada ay qeyb ka noqon doonaan horumarinta adeegyada dadka ku nool Minnesota. Kaliya iskaanka QR code-ka si aad sheekadaada u gudbiso. Gudbinta waa mid aan magaca la raacin (anonymous). QR code-ka dib ayaan u soo bandhigi doonaa dhamaadka munaasabaddayada, haddii aadan hadda fursad u helin inaad gasho.Anagoo sii wadeyna la shaqeynta qoysaska iyo dhisidda barnaamijyo adag, waxaa muhiim ah inaan aqoonsano iskaashiga xoogganі ee lagu taageerayo barayaal iyo barnaamijyada ECFE.Waxaad hadda maqli doontaan Chan oo ka tirsan ECFE, iyo ururka Minnesota Association for Early Education. Ururadan waxay si wadajir ah u shaqeeyaan si loo hubiyo in barayaasheenna iyo barnaamijyadeennu helaan agabkii iyo kheyraadkii ay u baahnaayeen si ay u bixiyaan barnaamij tayo sare leh oo runtii saameyn ku leh qoysaska.Ku soo dhowaada Darcie, Shannon, iyo Betty.

>>DARCY RODRIGUEZ: Anigu waxaan ahay Darcie Rodriguez, waxaana la shaqeeyaa ECFE iyo Mike Brown. Waxaan ka mid ahay khubarada waxbarashada ee Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska (Department of Children, Youth, and Families). Shaqadeennu ee waaxda waa inaan korjoogteyno oo taageerno barnaamijyada ECFE guud ahaan gobolka Minnesota. Waxaan taas ku qabannaa siyaabo kala duwan oo ay ka mid yihiin: taageero farsamo, hagitaan, fikrado horumarin ah, xeelado lagu kobciyo ka-qaybgalka, taageero hoggaamineed, iyo suuq-geyn iyo qorsheyn heer gobol ah. Waxaan sidoo kale si firfircoon uga shaqeynaa in aan dhisno xiriirro guud ahaan gobolka la leh barnaamijyada kale ee taageera

carruurnimada hore. Markii aan bilownay qorsheynta munaasabaddan, si dhaqso ah ayaan u garowsannay muhiimadda ay leedahay in la muujiyo hay'adaha — marka lagu daro DCYF — ee taageera barnaamijyada ECFE guud ahaan gobolka. Laba ka mid ah hay'adahaas waa MNAFEE iyo Jaamacadda Minnesota. Waxaan jeclaan lahaa inaan ku bilaabo soo bandhigista Shannon Radar, anigoo waydiinaya inay nala wadaagto doorka ay hay'addu ka ciyaarto taageerada barnaamijka.Betty, ma isbaran kartaa adiga oo yarna ka hadlaya waxa aad ka qabato taageerada ECFE?

>>BETTY COOKE: Waad mahadsan tahay, Darcie. Aad baan ugu faraxsanahay inaan salaamo dhammaan waalidiinta iyo shaqaalaha guud ahaan gobolka. Sharaf weyn ayey ii tahay inaan maanta idinla joogo si aan uga qeyb qaato dabaaldegga 50 sano ee ECFE. Anigu waxaan la xiriiray barnaamijkan 47 ka mid ah 50-kaas sano, tan iyo markii aan imid Minnesota sanadkii 1977, anigoo bilaabay shaqada baridda waalidiinta mid ka mid ah barnaamijyadii tijaabada ahaa ee uu Mike xusay—barnaamijkii Valley View.Waxaan muddo 15 sano ah hoggaan ka ahaa barnaamijka ECFE ee heer gobol oo aan ka shaqeynayay Wasaaradda Waxbarashada Minnesota (Minnesota Department of Education). Waxaan sidoo kale ka shaqeynayay Jaamacadda Minnesota muddo sanado badan ah, anigoo barayay waxbarashada waalidiinta, ruqsadda macallinimada, iyo koorsooyin loogu talagalay dadka u tababaranaya inay noqdaan barayaal waalidiin.Hadda waxaan ahay xubin ka tirsan guddiga iyo xubin u dooda barnaamijyada ururka Minnesota Association for Family and Early Education (MNAFEE), waxaana si joogto ah u ahay u doode xooggan oo u shaqeysa dadka aan u adeegno.Ururkeenna waa urur aan faa'iido doon ahayn (nonprofit) oo kor u qaada waxbarashada waalidiinta iyo barashada carruurnimada hore. Waxaa jira siyaabo badan oo aan u taageerno ECFE iyo horumarka xirfadeed ee macallimiinta carruurnimada hore—taas oo aan ku gaarno shir sanadle ah iyo aqoon-is-weydaarsiyo sannadkii inta uu socdo. Waxaan sidoo kale aqoonsannaa waxqabadka heer sare ah iyada oo loo marayo abaal-marinno sannadle ah. Waxaan u doodnaa siyaasado taageera barnaamijyada, barayaasha waalidiinta, barayaasha carruurnimada hore, iyo qoysaska ay u adeegaan. Waxaan dhiirrigelinnaa iskaashi iyo wada-shaqeyn u adeegta carruurta yaryar iyo qoysaskooda, sida ay Diane Halsey ku xustay hadalkeedii hordhaca ahaa.Hadda waxaan jeclaan lahaa in aan gudbiyo hadalka ML. Fadlan isbar oo nala wadaag doorka aad ka ciyaarto gaar ahaan dhinaca waxbarashada.

